



Kalaay waxay la hadashaa dhirta

- ✎ Ursula Nafula
- 👤 Jesse Pietersen
- 💬 Abdi Muse
- 💬 somaliska
- 📊 nivå 2





Tani waa Kalaay. Waxay jirtaa toddoba sano.
Magaceeda macnihiisa waa “midda
wanaagsan” luqaddeeda, Lubukusu.



Kalaay way soo toostaa waxeyna lahadashaa geedka liinta ah. “Fadlan geedka liinta ahoow, weynoow oo na sii liin badan oo bissil.”



Kalaay waxay aadaa dugsiga. Jidka waxay kula hadashaa cawska. "Fadlan caws, weynoow cagaaro oo ha qallalin."



Kalaay waxay soo martaa ubaxyo duureed.
“Fadlan ubaxyo, sii magoola, si aan timaheyga
idiin saarto.”



Iskuulka, Kalaay waxay la hadashaa geedka dhexda xerada ku yaallo. "Fadlan geed, so saar laamo waaweyn si aan ugu akhrisano hooskaada."



Kalaay waxay la hadashaa bowdka ku wareegsan dugsigeeda. “Fadlan u kora si awoodleh oo joojiya soogallida dadka xun.”



Markay Kalaay guriga ku laabato, waxay booqataa geedka liinta.” Miyay bislaadeen midhahaada wali?” Ayey weydisaa Khalaay.



“Liinta weli waa cagaar,” ayay ku neef tuurtay Kalaay “Waxaan ku arki doonaa berrito geedka liintaw,” ayay tidhi Khalaay. “Malaha markaas baad ii yeelan doonto midho liin ah oo bislaaday!”



Sagor för barn på svenska

berattelser.se

Kalaay waxay la hadashaa dhirta

Skriven av: Ursula Nafula

Illustrerad av: Jesse Pietersen

Översatt av: Abdi Muse

Denna saga kommer från African Storybook (africanstorybook.org) och vidarebefordras av Sagor för barn på svenska (<https://berattelser.se/>), som erbjuder sagor på många språk som talas i Sverige.

Detta verk är licensierat under en Creative Commons
[Erkännande 4.0 Internasjonal Lisens](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/).